

## **Guur an ka La'aado**



Xalwo Bulxan Cali

---

### ***Tixdan***

*Tixdan ‘guur an ka la`aado’ waxaa tiriay abwaanad Xalwo Bulxan Cali, Febraayo 2000; wuxuuna ku saabsan yahay sifooyinka xunxun ee ay tahay in ragga leh ay gabdhuhu ka digtoonaadaan guurkooda. Sifooyinkani waa kuwo dhantaalaya xilka iyo kaalinta aabbaha ama sayga laga sugayo.*

*Tixdani waxa uu daba socdaa laba gabay oo ay kala tiriyeen abwaan Aw Yuusuf-Barre, abaaro sannadkii 1922, iyo abwaan Cabdiqaadir Yamyam, sannadkii 1976. Labadan abwaan wiilasha guurdoonka ah ayay kala taliyeen gabdhaha ay tahay inay guursadaan. Abwaanad Xalwo, waxa ay dhamaystirtay dardaarankii, oo gabdhihi ayay, iyaduna, kala talisay wiilasha ay tahay inay guursadaan!*

*Maadaama aan la koobi karin, tilmaamaha wanaagsan, ee rag iyo dumarba; saddexda abwaan waxay doorbideen inay taxaan tilmaamaha xunxun ee ay tahay in laga digtoonaado. Dhinaca kale, saddexda gabayba waa waano ku socota guurdoonka, wiilal iyo gabdhaba, oo looga digayo dhaliilaha guurka seejin kara.*

*Tixdani waa 116 meeris, waxayna abwaanaddu baraarujinaysaa 24 sifo, oo ay tahay in ragga leh ay gabdhuhu guurkooda ka fiirsadaan!*

1. Indhoweyd murtidii geyfanayd, waanigaan geline<sup>1</sup>
2. Waa tii an gees maray naxwihi, Guulle ii qoraye
3. Maantana rag baa igu gujaye, ma anan goobeene
4. Ruuxna gaar umay laha murtidu, waa qofkii garane
5. Gabdhihi la caayee xumaha, gurada loo saaray
6. Haddii an gar eexaad la naqin, waa gef hadalkaase
7. Idinkuba wax baad galalaftaan, kala guraysaane
8. Maxaa libin ku-geeraarka iyo, guusha idin siiyay?
9. Guyaal iyo guyaal badan haddii, nalagu soo guuray
10. Goor iyo ayaamaba haddaan, ciil la galawlaynay
11. Caro gaamurtaan wada qabnaa, gebi ahaanteene
12. Gacan bidix ayaad nagu waddeen, tan iyo goortaase
13. Haddii ay gadoodaan habluhu, lama guhaadsheene
14. Gabayaa inay noo kaceen, geliya laabtiinna.
15. Aqoonyahanno gaamuroo murtida, kala gorfaynaaya
16. Inay maanta wada geyfanyiin, geliya laabtiina.
17. Markiise an garaadsaday iyo haddooy, garashaday buuxdo
18. Raggu waxay abiid guranayeen, godob xumaataahe
19. Garaadli'i ma haysee gabdhaha, jaaniskaan gabaye
20. Guriga iyo intaan ubadka iyo, fool galgalanaynay
21. Nagu gaadde gabayada xunoo, gubaya jiirkeenna
22. Gefkaad naga gasheen inuu ciqaab, idin geyaysiyo
23. Rabbina idin gargaarinoo nabsigu, idinku soo guuro
24. Guyaal baan sugaynoo waqtigi, waa la soo galaye
25. Guryihayo haddaad naga jafteen, ubad gardaadsiinta
26. An googaalaysannee inan ragow, goobta noo fidiya
27. Guushuna kuway raacdoo aan, wada guuttoonsiinno!!
  
28. Afartaa gorfeeyaye mid kale, aan giraangiriyo
29. Geyriyo ufada soo dhacdiyo, yaare aan geliyo
30. Gucummaale aar iyo sidii, goosha an u riimo

31. An guulguulo afarrey-guntaha, guushu waa aniyeye
32. Goshana aan la baxo kaan naxwaha, garan ujeedkiisa
33. Xaadadana aan soo gudbiyo, waa gun weyn tahaye.
  
34. Aw Yuusuf gabayguu tirshiyo, gedihi uu sheegay<sup>2</sup>
35. Yamyamna uu ka gaaftee u yiri, guur an ka la'aado.<sup>3</sup>
36. Aniguba geddaas oo kalaan, qayb ka gaabsadaye
37. Nama wada geyaan nimanku oo, qaar ayaa gudhane
38. Kuwa gogosha aan loo dhigayn, goyn an ka higaadsho.<sup>4</sup>
  
39. Dabaguraha gooraha xun jecel, gabar ardaa jiifta
40. Gaatamaha tuugada u guda, goor dhexiyo leyinka
41. Gaajoonahaas aan dhergayn, guur an ka la'aado.
  
42. Midka giniga haystee ku xira, jeebka gudihiisa
43. Een garanin reerkaaga geli, Guulle wuxu siiyay
44. Intii aan galuubnaan lahaa, guur an ka la'aado.
  
45. Marti geyre dhaxanliyo ku timid, guure iyo dheelmad
46. Gogol kaan u soo qaadinoon, sooryo gelinaynin
47. Intii gacalku soo hiifi laa, guur an ka la'aado.
  
48. Midkaan geedka laga naadin oo, goobta laga sheegin
49. Oon tirada la soo gelin kolley, saami waa gabaye
50. Intuu aniga ii guuxi laa, guur an ka la'aado.
  
51. Midkaan ehelka garan oon wanaag, gacan u qaadaynin
52. Ilmadowda gaajoon midkaan, gelin qadaa siinnin
53. Intay guriga ii ooyi layd, guur an ka la'aado.
  
54. Midka gada dharkiisoo rahmada, waa gu' baaqsadaye
55. Intuu qaad ku soo gadan lahaa, go'a sariirtayda
56. Ima geyo nin qaawane midkaa, guur an ka la'aado.

57. Kaan garan salaaddiyo waqtiga, Guulle faral yeelay
58. Googoyska cibaadada gefaye, geesta uga leexday
59. Oon masaajid soo gelin waqiis, guur an ka la'aado.
  
60. Midka guurka diidoo macsida, abidki goobaaya
61. Een garan samaantee xumaha, daba guclaynaaya
62. Saaniga Ilaahay ka go'ay, guur an ka la'aado.
  
63. Midka Diinta garanaaya ee, gooyay dhaqankeeda
64. Shareecada midkaa garab maree, gaalo dabaraacay
65. Garaadxumaa u geysaye dulliga, guur an ka la'aado.
  
66. Caasi ganaya hooyadi intuu, gumuc u soo qaato
67. Ama cay ku gaacina hayoo, nabar ku guulaaya
68. Gayaan kuma habboonee midkaa, guur an ka la'aado.
  
69. Garruun xaasidnimo loo tabcoon, garasho hoos oollin
70. Gafuurjabin midkaa ila rabeen, gacalo ii haynin
71. Intuu ii la gaatami laa bud weyn, guur an ka la'aado.
  
72. Xilagube gasiin iyo an bixin, maro is gaarsiisan
73. Guudkana Islaam uga egoo, gogosha ii jiifa
74. Intii goor xun aan ooyi laa, guur an ka la'aado.
  
75. Guullihii abuurtyo Nebiga, caydood kan u geyfan
76. Gaboodfalaha Diintii gudbaye, dhaar an kala goynin
77. Gaalkaas Ilaahay ka go'ay, guur an ka la'aado.
  
78. Gaarida wanaagga leh midkaan, garan abaalkeeda
79. Gafuur-buure aan ruuxna garan, wuxuu gollaynaayo
80. Gujeeyaha gunuusee guryama, guur an ka la'aado.
  
81. Kaan jikada gelaynoo ilmaha, gelinna haynayn
82. Oo aan garawshiyo lahayn, saacidee gabadha

83. gacan kaan i siinayn bugtada, guur an ka la'aado.
84. Waalidkay midkaan gobonnimiyo, sharaf ka goobaynin
85. Guuleed walaalkay ninkaan, gaar u magacaabin
86. Ee xididka gooyee an rabin, guur an ka la'aado.
87. Gabagabo dagaal iyo markii, cadaw la guulaayo
88. Gantaalaha markii laysku ridee, geesi diriraayay
89. Giiryaalaha gadaashayda maray, guur an ka la'aado.
90. Midka Gaawadii oo dhashiyo, Goodir daba jooga
91. Galaxdeeda caanaha midkaan, goommanaha siinnin
92. Bakhayl gurigi looma soo hoydee, guur an ka la'aado.
93. Mooryaanka gaajoon oo waddada, tuugadaw gelaya
94. Googaradda dumarkiyo midkaan, garanna dhaafeeyin
95. Jidgooyaha Islaamkii gambiyay, guur an ka la'aado.
96. Qabqablaha gumaadee shacbiga, dhiiggood gadanaaya
97. Dawlad gaamurtiyo kaan jeclayn, calan shangeesooda
98. Oo gaar keligi nolol u raba, guur an ka la'aado.
99. Balwad kay gagabisee fadhiya, cooshka laga guuray
100. Qaadkiyo garaabada midkaa, guranayee jiifa
101. Oo qiimihii nolosha gabay, guur an ka la'aado.
102. Hinaasaha guryama oo shakigu, gebigi buux dhaafshay
103. Gurigayga kii soo hormara, guullan ka-horgeyska
104. Guufanayska waardiyaha gala, guur an ka la'aado.
105. Guur badane gabadhuu arkaba, meher la gaadaaya
106. Xannaanada gurboodkana dayaca, gurina aan joogin
107. Gododlaha cidlada iiga guday, guur an ka la'aado.

108. Midka deriska guulguula ee, gawnaxyada buura
109. Intuu guriga joogana Cambaro, gaabsatee cararto
110. Xaawaleyda kaa gabawarana, guur an ka la'aado.
  
111. Allow deeqsi geesiya halyey, diinta garanaaya
112. Garaad badane gobannimiyo sharaf, looga gogol yeelay
113. Adaan gacanta kuu hoorsadee, calafku ii geeyo
  
114. Gabay kuma idlayn karo raggaan, gacalo loo hayne
115. Damiirkiisa-gade baa jiriyo, ceebta gurigeede
116. Dumaroow garwaaqsada raggii, laga gol roonaaye.

### **Tilmaamo**

<sup>1</sup> Qaybtan, meerisyada 1-27, waa arar ah gabaykufaan iyo goodin uu weheliyo garnaqsi.

<sup>2</sup> Waa Yuusuf Maxamed Xirsi (Aw Yuusuf-Barre). Qiyaastii sannadkii 1922<sup>ki</sup> ayuu tiriay gabaygiisa ‘guur an ka la`aado’, oo abwaanku ku sheegay sifooyinka xunxun ee gabadhii leh ay tahay in guurkeeda laga fiirsado.

<sup>3</sup> Waa abwaan Cabdiqaadir Xirsi Siyaad (Yamyam) (1945-2005), wuxuu isna tiriay gabay la yiraahdo ‘guur an ka la`aado’ sannadkii 1976. Gabaygani wuxuu kaabayaan gabaygii Aw Yuusuf-Barre, isagoo ka duulaya waayaha cusub ee soo kordhay.

<sup>4</sup> Meerisyada 39-110 abwaanaddu waxay ku tilmaantay 24 sifo xun oo ragga leh ay tahay gabdhuhu inayna u xiisin guurkooda. Dhinaca kalena, tani waxay baraarujin u tahay ragga, oo ay tahay inay iska ilaaliyaan sifooyinkan ay haweenku neceb yihiin!

## About This Journal

**Somali Studies:** A peer-reviewed academic journal for Somali studies is a broad scope multidisciplinary academic journal devoted to Somali studies; published annually by the Institute for Somali Studies in print and online forms. **Somali Studies** aims to promote a scholarly understanding of Somalia, the Horn of Africa and the Somali diaspora communities around the globe.

**Somali Studies** provides a forum for publication of academic articles in broad scope of areas and disciplines in Somali studies, particularly focused on the humanities and social science. **Somali Studies** appreciates papers exploring the historical background or navigating the contemporary issues; special consideration will be given to issues which are critical to the recovery and rebuilding of Somalia, a country emerging from a devastating civil war.

**Institute for Somali Studies** (ISOS) is a research centre within Mogadishu University. The Institute aims at knowledge generation through research and analysis on Somalia, Horn of Africa, and the Somali communities in abroad. The institute conducts and coordinates researches, workshops, conferences, discussions and dialogues; and disseminates findings, reports, and analysis through publications and events.

**Somali Studies** is open access journal and all articles are freely available to read, print and download from the website of the Institute.

**Disclaimer:** All views and opinions expressed in the article(s) published in **Somali Studies** journal are the sole responsibility of author(s) of the article(s). It does not necessarily reflect those of the editors, the Journal, nor the Institute for Somali Studies.

Copyright© 2017 by Institute for Somali Studies  
All rights reserved

Published by Institute for Somali Studies

Website: [www.isos.so](http://www.isos.so) - Email: [isos@mu.edu.so](mailto:isos@mu.edu.so)  
Tel/Fax: +252 1 858118  
Mogadishu, Somalia

Printed in Somalia